# Lue lapselle.

Somali



# Ilmo wax loo akhriyay wuxuu...

**Macluumaad ku socota waalidka:**
Muhiimada wax u akhriska ilmaha

## 1. u kori doonaa si ka kalsooni badan iyo si ka dhax-gal badan koox ahaan

Sida lagu sheegay daraasad, carruurta si joogto buugaag loo aqriyo si ka badan ayeey bulshada miyir iyo naxariis uga dhax leeyihiin iyo si ka fiican ayeey ula qabsadaan kooxaha kale.

## 2. bartaa ereyoyin ka baaxad badan

Daraasadaha waxay muujiyeen in markii ay gaaraan seddax jir, carruurta ku nool qoysaska buugaagta laga aqriyo ay maqleen 20 milyuun ereyoyin ka badan carruurta qoysaska waxba aqrinin. Aqoonta ereyoyin ka badan ayaa ilmaha u fududeynaayo inay dadka kale si ka fiican isku sharraxaan.

## 3. ahaan doonaa qof ka guul badan dugsiga

Ilmo bartey sheekoyinka iyo heesaha carruurta ka hor intuu bilaabin dugsiga ayaa dugsiga si ka badan ku horumaro iyo guulo ka gaaro markii loo barbardhigo ilmaha aan waxba aqrinin.

## 4. si ka wanaagsan u bilaabaa noloshiisa

Sida lagu sheegay daraasad, guulka mustaqbalka ee ilmaha waxaa si badan saamayn ku leh haddii ilmaha wax loo aqriyey markuu yaraa markii loo barbardhigo aasaaska dhaqan iyo dhaqaale ee waalidkiisa.

## 5. ahaan doonaa mid si ka badan ku hadlo guriga

Markii ilmahaada si cod sare wax ugu aqriso wuxuu xoojinayaa xiriirka qoyska. Qoysaska aqriyo buugaag badan si ka badan ayeey u sheekaystaan. Ayadoo loo maraayo sheekoyin, dhacdooyinka maalinlaha ayaa laga hadli karaa, iyo dhibaatooyinka nolosha si ka fiican ayaa loo fahmi karaa iyo wax laga qaban karaa.

## 6. noqdaa qof wayn ee ka firfircoon iyo hadaf ku jihaysan.

Dadka wayn ee fir-fircoon iyo hadaf ku jihaysan waa kuwa wax si ka badan wax loo aqriyay markii ay ilmo ahaayeen iyo waxay sii wadaan inay buugaag aqriyaan markii ay weynaadaan. Si ka fudud ayeey u sheegi karaan ra'yigooda iyo waxay gaari karaan hadafyadooda.




**Rubuc saac wax-akhris ah maalintii waa rubuc wadajir ah.**

§


**Ilmo kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu buugaagta ku akhristo luqada nolol-maadmeedkooda muhiimka u ah.**



## Muhiimadda luqada hooyo

Luqada hooyada waa midka uu qofka ku muujiyo shucuurtiisa. Markii waalid uu ilmahiisa buug ugu aqriyo luqada hooyo, wuxuu ku caawinayaa in xiriir xoog leh laga dhax sameeyo waalidka iyo ilmaha, iyo dhisidda ereyoyinka uu ilmaha ku macnayn doono shucuurtiisa ama waxa uu dareemo - kaasoo qayb lagama marmaan ka ah caafimaadka maskxada iyo shucuurta.

# Buugga wuxuu ku habboon yahay da' walba



## Wax ku aqriska cod sare waa maalgelinta ugu fiican aad u samayn kartid mustaqbalka ilmahaada.

Aasaaska kartida iyo xamaasada wax aqriska ilmaha waxaa la abuuraa xilliga ilmanimadooda. Saamaynta uu waalidka ku leeyahay aqoonta wax akhriska ilmaha wuxuu aad muhiim u yahay ka hor intuu ilmaha baranin inuu keligii wax akhristo.

## dhallaanka waa qof sii fiican wax u dhegeysto

Codadka la yaqaan ee xubinada qoyska oo leh laxan is-bedbedel leh wuxuu quudhiyaa aqoonta luqada ee ilmaha. Hadiyadda ugu fiican aad siin kartid dhallaanka waa luqad hooyo ee hodan.

## ilmaha 6-bilood-jirka wuxuu marka horey buugga u arkaa sidii wax lagu ciyaaro

Ilmaha buugga wuu ku ciyaaraa, afka ayuu geliyaa iyo wuu dhedhemiyaa. Xarafyada fudud iyo midabyada dhalaalaya ee buugaagta adag waa kuwo soo jiidasho leh.

## ilmaha 1-sano-jirka wuxuu jecel yahay waqtiyada sheeko loo aqriyo

Heesaha laxansan iyo gabayada waxay taageeraan horumarka hadalka ilmaha. Sheeko gaaban ama heesaha ilmaha yar loo heeso ayaa ilmaha dejiyo habeenka waqtiga seexashada ka hor.

## Ilmo 2-3-sano jir ah wuxuu bartaa ereyoyin cusub

Waqtiga sheekoyinka wuxuu noqonayaa mid is-dhexgal leh markii qofka wayn uu ilmaha weydiiyo inuu u sharraaxo wixii ka dhacaayo sawirada buugga. Markii awoodda feejignaanta ilmaha sii hagaago, waxaa fiican in laga wareego buugaagta adag iyo loo gudbo buugaagta sawirada leh.

## ilmaha 4-5-sano-jirka wuxuu bilaabi doonaa inuu ABC'da nolosha ka barto sheekoyinka

Sheekoyinka waxay ilmaha siiyaan awood uu si ammaan ah ku dareeemo cabsi iyo beerjileec ka dareemo shucuuro kala duwan. Heesaha iyo gabayada waxay ilmaha ku dhirrigeliyaan inuu keligii ku ciyaaro luqada.

## ilmo 6-sano-jir ah wuxuu hore uu isticmaalaa khayaal abuur

Ilmaha wuxuu hadda qabaa dulqaadka uu ku dhegeysto sheeko ka dheer. Wada hadal ku saabsan wixii la aqriyay ayaa xittaa qancin doono qofka wayn. Sheekoyinka ku saabsan xilliga ilmanimada qofka wayn ayaa ku caawin karo korinta ralli gelinta dhaqanka, iyo sameynta sheeko gaar u ah waalidka iyo cunugga.

## Ilmo 7-sano-jir ah si madaxbannaan ayuu u bilaabaa inuu xushto buugaagta uu rabo inuu aqriyo

Ilmaha wuxuu noqdaa qof xiiseynaayo xarafyada iyo wuxuu rabaa inuu keligii aqriyo. Barashada wax aqriska waa taariikh nooleed aad u wayn iyo istaahila in la dabbaaldego. Sheeko aqrinta ka dhaxeeeyo dadka wayn iyo ilmaha wuxuu weli yahay wax muhiim u ah ilmaha waqti dheer.

